



**Buugga Siyaasadda iyo Nidaamka Booliska
ee Waaxda Booliiska Minneapolis**

Tiro:
9-100

Cadadka 9aad – Siyaasadaha Dhaqangelinta

Xariga Dadka Waaweyn

**9-109 Katiinadaynta qofka La Xidhan/Xabbisan
(05/29/02)**

(A-B)

Dhammaan maxaabiista/kuwa Xidhan waa in gacmaha loo xidhaa gadaal gadaal, ilaa xaalad jidheed ama xaalado kale oo ay ku jiraan jirro, dhaawac ama naafonimo, aanay oggollaanayn. Katiinadaha gacanta waa in sidoo kale loo xidhaa habka labanlaabo (double locked) sida ugu dhakhsaha badan. Maxaabiista loo qaadayo HCADC waa in gacmaha la xidhaa. Maxaabiista waa in gacmaha la xidhaa mar kasta oo loo kaxeeyo meel ka baxsan xabsiga, marka laga reebo marka gacan-ka-jeebayntu ay joojinayso dhammaystirka baadhista.

Katiinado caag ah ayaa laga yaabaa in loo isticmaalo si loogu kabo katiinadaha caadiga ah marka ay jiraan xaalado degdeg ah. Waxa kale oo loo isticmaali karaa xaaladaha xadhig wadareedka waxaana laga heli karaa dhammaan baabuurta saraakiisha. Katiinado caag ah waa in aan loo isticmaalin xadhig dembiyeed ama xakamaynta shakhsiyaadka maskaxda ka buka.